**SOMALI RELIEF COMMITTEE**
**FOR DROUGHT VICTIMS**

لجنة الإ غاثة الصومالية
لمتضرري الجفاف

**GUDDIGA GURMADKA ABAARAHA SOOMAALIYA**

**Tel: 658565, 253638, 920202: Mobile: 577471, 524621, 286606**
**Email: kaalmeeye@hotmail.com**

**Ref: G.G.A.S/41/06 Date: 04/05/2006 06/04/1427.H. Muq.Somalia.**

## WARBIXIN KU SAABSAN XAALADDA GOBOLLADII AY ABAARUHU KU DHUFTEEN

Sida la og yahay waxaa la soo maray abaaro ba'an oo ku dhuftay gobollo ka mid ah dalka Soomaaliya gaar ahaan kuwa koonfureed , kuwaasoo salfaday dad iyo duunyaba raadkoodiina uu si buuxda uga muuqdo meelihii ay ka dhaceen , taasoo ummadda Soomaaliyeed dibed iyo gudaba iyo dad samafalayaal ah oo kale ay ka geysteen gacan wax ku ool ah , taasoo loo soo marsiiyey G.G.A .S .
Haddaba Alle mahaddii inta badan roobabkii guga waa ka da'een gobollada Soomaaliyeed , waxaana halkaas ku dhammaatay mushkiladdii oonka , waxaase weli sii jira raadkii abaartu reebtay oo aad u culus ,waxaana ka mid ah :-

1 – dad badan oo xoolo dhaqata ahaa waxaa ka dhammaaday xoolihii , waxayna ku soo urureen degaanno magaalooyinka ku yaal oo xeryo looga ooday .
2 – Dadkii beeraha qodan jirey meelaha abaaruhu ku dhufteen ma haystaan waxay cunaan oo ku noolaadaan inta beeruhu uga soo go'ayaan , qaarna waxba ma beeran karaan oo xitaa ma heli karaan abuurkii beeraha .
3 – Bakhtigii xoolaha oo gobollada qaar si xad dhaaf ah meel walba yaalla , wuxuu keenay cabsi cudurro halis , waxaa kaloo roobka ka dib dhashay cudurro ay ka mid yihiin Mallaryo , Jadeeco , shuban biyood , iwm.
4 – Waxaa kaloo jira dad badan oo horey qaxooti u ahaa oo abaarta iyo macaluushu iyana taabatay , qaar badanna haysan nolol iyo hoy ay ka galaan roobka iyo dhaxanta

## WAXQABADKA GUDDIGA ROOBABKA KA DIB

Roobka ka dib meelaha ay guddigu wax geeyeen waxaa ka mid ah , gob.SH/hoose in ka badan 40 magaalo iyo tuulo oo ay ka mid yihiin , Baraawe , K/waarrey , W/wen , Afgooye , Marka tuulooyin raacsan , Sablaale tuulooyin raacsan , waxaa kaloo guddiga deeqo raashin iyo baco ka qaybiyey degmada B/dheere qaxooti ku nool gaar ahaan xerada Kurmaan , iyo aagga G/haarrey iyo C/cadde .

Meelaha kale ee deeq raashin la geeyey waxaa ka mid ah J/hoose dhawr tuulo oo ka tirsan iyo gudaha magaalada qaxootiyaal deggan , wuxuu kaloo raashin ka qaybiyey degaanka Warsheekh ee SH/dhexe ..
Wuxuu guddiga ka furay degmada Baraawe isagoo gacan ka helay hay'adda Almanhal alkhayriya jiko ay ka quutaan 950 qof iyo tuulada Salagle oo ka tirsan gobolka J/dhexe oo ay ka quutaan 500 qof ,iyo jiko yar oo ku taal tuulada Garasweyne ee SH/dhexe oo uu bil raashinkeed bixiyey

WAX QABADKA ROOBABKA KA DIB LOO BAAHAN YAHAY

Waxyaabaha loo baahan roobabka ka dib waxaan ku soo koobaynnaa arrimahan soo socda:-

1 – Raashin loo qaybsho dadka cayroobay iyo beeralayda inta ay ka helayaan waxay ku kaaftoomaan ugu yaraan muddo saddex bilood ah.
2 – In la helo daawooyin iyo safarro caafimaad oo ka kooban dhakhaatiir iyo kal kaaliyayaal , si loo daweeyo dadka jirran ee aan haysan dhakhtar iyo dawo midna.
3 -In loo helo xeryahay dadka soo barakacay baco laga galo roobka .
4 – Si dhibaatada abaaraha looga sii gaashaanto waxaan soo jeedinaynnaa in la qodo ceelal dadka biyo ka helaan , waayo inta badan dhibaatada oonka waxaa sababa ceelal yaraanta ka jirtey goobihii abaaruhu ku dhufteen.
5 - In dadka abaaruhu xoola tireen loo sameeyo mashaariic iyo xirfado ay nolol ka raadsadaan sida , beera falasho , xoolo iyo gaadiid xoolaad oo loo gado , kalluumaysi iwm.
Guddigu wuxuu ayaamahan wadaa daraasad arrinkaas ku saabsan , markay dhammaatana waan idiin soo gudbinaynnaa haddii Alle idmo.

DEEQAHA DHOWAAN SOO GAADHAY GUDDIGA

Asbuucan waxaa guddiga soo gaadhay deeqo kala duwan oo ka kala yimid jaaliyadaha dibedda , waxaan ka xusi karnaa kuwan soo socda :-
1 – Deeq ka timid dalka Ugaandha 03/05/2006, taasoo ay soo urursheen dadka Soomaaliyeed ee ku nool dalkaas , dhammaanna ay ka qayb qaateen ,sida ganacsatada , dhallinyarada , culimada , haweenka iwm. , waxay dhan tahay deeqdaasi 30,000$ , waana deeqdii ugu badnayd ee ka timaadda jaaliyadaha , haddaannu guddiga gurmadka nahay waxaan halkan uga soo jeedinaynnaa mahad aad u ballaaran dadka Soomaaliyeed ee ku sugan dalkaas , waxaan leennahay Alle khayr ka badan oo ka wanaagsan ha idin siiyo kaad bixiseen , dedaalkaa hormuudka ahna yaan cid kale koobka idinka qaadin , annaguna waxaan ballan qaadaynnaa inaan xoolahaas ku bixinno meelahii aad ugu deeqdeen oo ah caawinta dadka abaaruhu wax yeelleeyeen.
2 – Dalka Germany laba meelood ka mid ah , waa magaalada Boon waxaa naga soo gaadhay lacag dhan 1225$ , iyo Berlin waxaa naga soo gaadhay 693$.
3 – Dalka Canada magaalada Toronto dhallinyaro Soomaaliyeed urur ay leeyihiin oo la yiraahdo Daynile cultural association Wuxuu maanta na soo gaadhsiiyey lacag dhan 753 $ , waxaana na soo gaadhsiiyey Cumar SH.Maxamed .
dhammaan dadka wax baxsaday ama abaabulay waxaan ugu duceynaynnaa khayr , waxaannuna leennahay dedaalka halkaas ka wada , ogaadana intaad walaalihiin u gargaaraysaan Allena waa idiin gargaarayaa .

BAAQA GUDDIGA

Dadka Soomaaliyeed waa inay is caawiyaan , isu xoolo jaraan , beel walba ama degaan walba waa inuu dadkiisa dhibaataysan wax u qabto , xoolo u urursho oo aan gacan kale in la sugo caado laga dhigan , waa inaan nooleynnaa mabda'a isku tashiga Alle ka sokow la isku tashado , waxaan ku farxay hadda ka hor war la iiga sheegay qabaai'il deggan degmada C/rigaabo oo culimadeedii iyo waxgaradkeedii beeshoodii zeko ka ururusheen kuna maalgeliyeen dadka fuqarada ah ee beesha , markii beeshii isku filnaatayna dadkii kale zekadii wax ka siiyeen , runtii waa arrin ku dayasho mudan oo lagu farxo , waxaadna mooddaa dadkii Soomaaliyeed hadday habkan bilowday ay ku socdaan inay dadnimo , sharaf iyo cizzi gaarayaan .
Waxaan ugu baaqaynnaa dadka Soomaaliyeed inay Alle u laabtaan joojiyaan colaadaha , nooleeyaan walaalnimada iyo isku duubnida .
Ugu danbeyn , inta Alle wax siiyey waa inay wax baxsadaan oo walaalahood caawiyeen intay dad shisheeye u gacan hoorsan lahaayeen.
wax baxsada berri baad u aayi doontaane , dadkiinna caawiya Alle ha idin caawiyee .

Guddoomiyaha Guddiga Gurmadka Abaaraha Soomaaliyeed
Axmad Muxammad Suleymaan
kaalmeeye@hotmail.com

---

**Faafin: www.SomaliTalk.com | May 5, 2006**